

Sharci lamba. 14 ee 15 Agoosto ee 1966

Wax ka Bedelidda Xeer Nidaamiyaha Garsoora ee la Ansixiyey Dekreeto-Sharci lamba. 3 ee 12 Juun 1962

MADAXWEYNAHA JAMHUURIYADA

Kadib markii uu garowsaday oggolanshaha Golaha Qaranka.

WAXAA LA SOO SAARAY

Qod. 1

1. Muddada ay tijaabada ay gaarsooreyaasha ku jiraan sida ku qoran faqradda 1aad ee qod. 20 ee Dekreetada-dharci lamba. 3 ee 12 Juun 1962 kuna saabsan Xeeridamiyaha Garsoorka waxaa looga dhigay 6 bilood kuwa ku guleystay tartaanka ha haystaan ama yaysan yasnin shahaadada jamacadda;
2. Kadib markii loo aqonsado sida ku qoran faqradda 2aad ee isla qodobka 20 waxaa la magacaabi doono:
 - a) Kuwa ku guleystay iyagoo haysta shahaadada jamacaada ee sharciga waxaa ay qaban doonaan darajada Ku-Xigeenka Garsooraha Maxkamadda Gobolka iyo jagooyinka u dhigmata;
 - b) Kuwa ku guuleystay iyagoo haysta Shahaadada Machadka Jamacadeed ee Somaliya ama darajo u dhigmata waxaa lagu qaatay darajada Garsoore Degmo ama darajo u dhigmata;
 - c) Kuwa ku guuleystay iyagoo leh Shahaadada Dugsiga Taclinta Islamka oo ku takhasusay Shareeca Islamka ama darajo u dhigmata waxaa lagu magacaabi doono darajada kowadda ama mid u dhiganta howlaha Garsooraha Degmada.

Qod. 2

1. Kadib markii laga reebo marxaladda ku tilmaaman faqradda 2aad ee qodobka 19 ee Xeeridamiyaha Garsoorka lamba. 3 ee 12 Juun 1962, ilaa iyo muddo hal sano ilaa iyo intii uu sharcigaan ka hirgeli doono waxaa loo oggoladay in la qoro ciddi ka soo qeyb qasha tartan iyagoo aanan haysanin shahaadada jamacadda ee Sharciga ama Shahaadada aqoonta sharciga ama u dhigmada
2. Ciddii ku guleysta tartaanka ee ku tilmaaman faqradda sare looma dalacsiin kara darajo ama howlaha ka sareeyo Ku-Xigeenka Garsooraha Degmada

Qod. 3

1. Garsoorayaasha lagu tilmaamay xarfka b) ee faqradda ee faqradda 2 ee qodobka sare ku xusan looma dallacsiin karo ama looma magacaabi kara ama looma dhiibi karo howlaha ka sare kuwa Ku-Xigeenka Garsooraha Gobolka;
2. Garsoorayaasha lagu tilmaamay xarfka c) ee faqradda 2 ee qodobka sare ku xusan looma magacaabi karo mana loo dalacsin darajada iyo howlaha ka sareeyo Garsooraha Degmada;
3. Garsoorayaasha ku xusan xarfka a) ee faqradda 2aad ee qodobka sare ku xusan waxaa lagu dabaqi kara xeerka ku qoran qodobka 22 ee Dekreeto-Sharci lamba. 3 ee 12 Juun 1962 oo la xiriira dallacsiinta markii laga reebo amarrada ku qoran faqradda 1aad iyo 2aad ee isla qodobka 22.

Qod. 4

1. Garsoorayaasha haysta shahaadada heerka jamacaadeed waxay xaq uu leeyihin gunno xifraadeed, gunno guri sida ku qoran dekreetada lamba. 7 ee 30 Maarso 1965 oo loo beddeley sharci lamba. 8 ee 1da Juun 1965 oo lagu beddeley gunno dharka oo lagu qoray sharciga 12 ee 6 Luulyo 1965 taas oo aan ka yareyn laba gunno ee sare lagu tilmaamay;
2. Garsoorayaasha aanan haysanin shahaadada heer jamacaadeed oo lagu magacaabay darajada Ku-Xigeenka Garsooraha Gobolka wuxuu yeelan doonaa gunnada guriga oo la eg Sh.So. 300 iyo gunna dharka.

Qod. 5

Qodobka 21 ee dekreeto-Sharci lamba. 3 ee 12 Juun 1962 waxaa lagu beddeley:

1. Iyadoo laga reebay amarradda sare ku xusan, waxaa si ku meel gaar iyo ilaa iyo hab kale loo qorin waxaa lagu magaacbi karaa ciddi wadato shahaado jamacadeed jagooyinka:
 - Guddomiyaha Maxkamadda Sare 5 (shan) sano oo howlaha garsoorka;
 - Ku-Xigeenka Maxkamadda Sare 3 (seddax) sano ee howlaha garsoorka;
 - Xeer Ilaaliyaha 3 (seddax) sano ee howlaha garsoorka;
 - La-Taliye ama Guddomiye Gobolka Rafcaanka 2 (laba) sano ee howlaha garsoorka.
2. Iyadoo laga reebo xarafka b) ee faqradda labaad ee qodobka 28 ee sharciga lamba. 3 ee 12 Juun 1962, magacaabista faqradda sare ku xusan waxaa lagu heli kara dekreeto Madaxwynaha Jamhuuriyada isagoo la tixgeliyey soo jeedinta Wasiirka Caddaladda iyo Arrimaha Dinta iyo Guddiga Sare ee Garsoorka iyo go'aanka Golaha Wasiiradaha.

Qod. 6

Amarrada idaariga eek u xusan qod. 35 waxaa lagu dabaqi doono darajo kasto iyo howlaha garsoorka sida lagu carifay faqradda 2 ee qodobka sare ku qoran.

Qod. 7

Faqradda 2 ee qod. 24 ee Xeeridamiyaha Garsoorka oo laga ansiyey dekreeto-sharci lamb 3 ee 12 Juun 1962 waxaa loo beddeley sidatan:

“Looma bedeli karo goobo shaqo ee kale ama howlo kale haddii aysan la xiriirin ganaax ama baahi dhinaca adeega garsorka iyadoo la tixgelinaya aragtida Golaha Sare ee Garsoorka.

Qod. 8

Sharcigaan wuxuu hirgeli doona maalinta ku xigta markii la faafiyo. Waxaa lagu keydin doonaa Keydka Shuruucda iyo Dekreetoyinka ee Faafinta Rasmiga ee Jamhuuriyadda Somaliya.

Muqdisho, 15 Agoosto 1966.

Aden Abdulle Osman

Rai'sul Wasaaraha
Abdirizak Haji Hussein

Wasiirka Caddaladda iyo Arrimaha Diinta
Sh. Hassan Abdullahi Farah